



Hagaha Dejinta Isticmaalaha 2.0

OR PTC DCI
NOOCA 2.0



Tusmada

Afeef.....	2
Bud-dhigga Isticmaalaha.....	2
Baddal Baasweedhka.....	2
Illaaway Baasweedhkii.....	4
Baasweedh Cusub Codso.....	7
U gee PIN.....	10
Baddal PIN-ka.....	11
Baddal Su'aalaha Ammaanka.....	12
Change Email.....	15
Xaqiiji Lambarka Taleefanka Gacanta.....	17
Baddal Magaca Isticmaalaha.....	19

Afeef

Macluumaadka ku qoran dukumentigan waxa loogu talagalay isticmaalayaasha OR PTC DCI. Qoraalka shaashadda ee dukumentigani waxay ka yimaadeen dhinaca bixiyaha, laakiin tallaabooyinku waa isku mid dhammaan noocyada isticmaalayaasha ee kale.

Bud-dhigga Isticmaalaha

Markaad gasho Bogga Mareega OR PTC DCI, waad baddali kartaa lambar sireedkaaga/baasweedhkaaga, PIN-kaaga, su'aashaada ammaanka, iimeylkaaga, iyo magacaaga isticmaalaha. Sidoo kale waxaad xaqiijin kartaa lambarkaaga taleefanka gacanta. Haddii aadan gali karin Bogga Mareega OR PTC DCI, waxaad codsan kartaa lambar sireed cusub ama aad caawimo codsan kartaa sidii aad heli lahayd lambar sireed cusub. Haddii aad rabto inaad cusboonaysiiso macluumaad aan ku jirin hagahan, la xiriir xafiiska deegaankaaga (hadii aad tahay shaqaale, la xiriir kooxda Taageerada PTC).


Baddal Baasweedhka

Waxa dhici karta inaad rabto inaad baddasho baasweedhkaaga/lambar sireedkaaga OR PTC DCI.

Fiiro gaar ah: Si aad u baddasho baasweedhkaaga adigoo isticmaalaya habkan, waxa waajib ah inaad taqaan baasweedhkaaga hore.

Si aad u baddasho baasweedhkaaga:

1. Dooro astaanta qofka ee ku xigta magacaaga isticmaalaha.
2. Dooro Settings (Bud-dhigga).



The screenshot shows the user interface of the OR PTC DCI system. The user is logged in as Patrick Stump. The interface includes a navigation menu on the left with options like DASHBOOD, GELITAANKA, AKOONTAYAASHA, and CADDEYNTA BOROFAYLKA. The main content area displays the user's profile information, including the name Patrick Stump and the date range 05/28/2023 to 06/03/2023. There is a gauge chart showing a value of 2. The settings menu is open, showing options for Dejinta and Ka bax. A blue button labeled 'Kudar Geltaan' is also visible.

3. Gali baasweedhka hore.
4. Gali baasweedh cusub adigoo raacaya shuruudaha baasweedhka.
 - a. Qasab weeye inuu ahaado ugu yaraan 10 xaraf.
 - b. Qasab weeye inuu ku jiro 1 xaraf wayn ah, xaraf yar ah, lambar ah, iyo hal xuruufta gaarka ah.
 - c. Qasab weeye inaanu ku jirin xaraf laba jeer oo isku xiga soo noqdaa.
 - d. Qasab weeye inuu ka duwanaado 24-kaagii baasweedh ee ugu dambeeyey.
5. Qor baasweedhkaaga cusub mar labaad.
6. Dooro Change Password si aad u dhammaystirto baddalidda.

7. Dooro Yes si aad u xaqiijiso baddalidda baasweedhka.

- Intaas kadib waxaad arki doontaa liid cagaaran oo dhahaya "Password Changed Successfully!" Hadda baasweedh cusub ayaad leedahay, loomana baahna tallaabo kale inaad qaaddo.
- Dooro Home ama astaanta OR PTC DCI si aad ugu laabto bogga hore.


Illaaway Baasweedhkii

Haddaad illawday baasweedhkaagii oo uu jiro iimeyl faylka kuugu jiraa, waxaad codsan kartaa baasweedh cusub.

Si aad baasweedh cusub u codsato:

- Dooro badhanka "Forgot your password?" ee ku yaala shaashadda galitaanka.
- Gali cinwaanka iimeylka meesha loogu talagalay.
- Guji badhanka Send Reset Email.

4. Waxaad markaa arki doontaa xaqiijin. Tag iimeylkaaga ku jira faylka OR PTC DCI.



5. Fur iimeylka codsashada baasweedh cusub ee ka yimi orptcsupport@dcisoftware.com.


6. Guji Reset Password.



Fiiro gaar ah: Haddii aadan helin iimeylka:

- Ugu horrayn, hubi fooldharkaaga spam-ka.
- Kadib, waxaad wacdaa Xafiiska Barnaamijkaaga si aad u hubiso in cinwaanka iimeylka ee saxda ah uu faylka kuugu jiro.

7. Si aad baasweedh cusub u codsato, waxa waajib ah inaad sheegto mid ahaan:
 - a. Jawaabta su'aashaada ammaanka, **ama**
 - b. 4 god ee u dambeeya ee lambarkaaga sooshiyaal Sikiyuuriti **iy**o taariikhda aad dhalatay.
8. Gali jawaabta mid ahaan, kadib guji Verify.



Fiiro gaar ah:

Ikhtiyaarka b ayey dhici kartaa inaan la heli karin haddii OR PTC DCI aysan faylka kuugu hayn macluumaadka loo baahan yahay.

9. Gali baasweedhka cusub ee aad rabto inaad isticmaasho.
10. Mar labaad gali baasweedhka cusub.
11. Dooro badhanka Reset si aad u dhammaystirto codsashada baasweedhka cusub.



Fiiro gaar ah: Dooro

astaanta "i" ee madow si aad u hesho shuruudaha baasweedhka.

12. Guji Yes si aad u xaqiijiso baasweedhka cusub. Waxa lagugu celin doonaa shaashadda galitaanka ee OR PTC DCI. Gali magacaaga isticmaalaha iyo baasweedhka cusub si aad u gasho.



Baasweedh Cusub Codso

Haddii aad awoodi waydo inaad xaqiijiso naftaada adigoo isticmaalaya linkiga Illaaway Baasweedhka, kala xiriir Miiska Caawinta ee DCI 855-565-0155 ama Xafiiska Deegaankaaga si aad u codsato baasweedh cusub.


Marka baasweedhka cusub la codsado, raac tallaabooyinkan:

1. Fur iimeylka codsiga baasweedhka cusub ee ka yimi orptcsupport@dcisoftware.com oo dooro badhanka Reset Password si aad u kiciso Bogga Boortalka OR PTC DCI.

Fiiro gaar ah: Shaqaaluhu waxay ugu dirayaan iimeyl Kooxda Taageerada PTC PTC.Support@odhsoha.or.egon.gov. Shaqaaluhu lama xiriiraan Miiska Caawinta ee DCI.

Fiiro gaar ah: Haddii aadan helin iimeylka:

- Ugu horrayn, hubi fooldharkaaga spam-ka.
- Kadib, waxaad wacdaa Xafiiska Deegaankaaga si aad u hubiso in cinwaanka iimeylka ee saxda ah uu faylka kuugu jiro OR PTC DCI.



2. Gali baasweedhka cusub ee aad jeclaan lahayd inaad isticmaasho.
3. Marlabaad gali baasweedhka cusub.
4. Dooro badhanka Reset aad u dhammaystirto codsashada baasweedhka cusub.
5. Dooro Yes si aad u xaqiijiso codsashada baasweedhka cusub.

si



Fiiro gaar ah: Dooro astaanta “i” ee madow si aad u hesho shuruudaha baasweedhka.

Marka xiga ee aad galayso OR PTC DCI, waxa lagu sheegi inaad cusboonaysiiso macluumaadkaaga ammaanka.

1. Dooro su'aal ammaan oo cusub.
2. Gali jawaab ammaan oo cusub.
3. Dooro Save si aad u kaydiso macluumaadka ammaanka ee cusub.

Fadlan cusbooneysii faahfaahinta amniga

Borofaylkaada

1 Su'aal: * Fadlan dooro Su'aasha Amniga

Jawaab: Qor Jawaabta Amniga 2

3 Keydso

Fiiro gaar ah: Haddii aadan isticmaalin PIN, dhammaystirka tallaabada 3 waxay dhammaystiraysaa codsiga baasweedhka cusub. Haddii aad isticmaasho PIN, waxa waajib ah inaad u gayso PIN cusub (eeg [Add PIN](#) wixii tilmaamo ah).

U gee PIN

Haddii aad la xiriirto Miiska Caawinta DCI ama Taageerada PTC si lagaa kaalmeeyo baasweethka, waxa dhici karta inay xisaabtaada dib kuugu sameeyaan. Samaynta sidaasi waxay kaaga baahan tahay inaad u gayso PIN cusub. Sidoo kale waxa dhici karta inaad u gayso/baddasho PIN-kaaga sababtoo ah waxa loogu baahan yahay laanlaynka OR PTC DCI.

1. Dooro astaanta qofka ee ku xigta magacaaga isticmaalaha.
2. Dooro Settings (Bud-dhigga).

The screenshot shows the DCI user dashboard for Patrick Stump. The user profile is visible at the top right, with a dropdown menu containing 'Dejinta' (Settings) and 'Ka bax' (Logout). The dashboard displays the user's name, a date range from 05/21/2023 to 05/27/2023, and a progress bar for 'Qiyasta Wakhtiga' (Time Test) with three segments: 0-30, 30-40, and 40+. Below this, there is a table for 'Wadarta Saacadaha' (Time Spent) with columns for 'La ogolaaday' (Approved), 'Saacadaha la sugaya' (Pending), and 'Saacado Aan La Xaqiijin' (Not Verified), all showing 0.00.

3. Guji Add New Pin.
4. Gali PIN-ka Cusub.
5. Xaqiiji PIN-ka.
6. Dooro Add New PIN.

The screenshot shows the 'Kudar Biin Cusub' (Add New PIN) form. The form has two input fields: 'Biin Cusub: *' (New PIN) and 'Hubi Biinka: *' (Verify PIN). The 'Biin Cusub' field contains the text 'Fadlan gali Biin Cusub' and the 'Hubi Biinka' field contains 'Fadlan Xaqiiji Biin'. There are two buttons at the bottom: 'Jooji' (Cancel) and 'Kudar Biin Cusub' (Add New PIN).

7. Dooro Yes si aad u xaqiijiso PIN-ka cusub.



Baasweedhka dib ayaa loo sameeyey PIN-kana waa la cusboonaysiiyey.




Baddal PIN-ka

Waxaad baddali kartaa PIN-kaaga OR PTC DCI markii aad rabto.


1. Dooro astaanta qofka ee ku xigta magacaaga isticmaalaha.
2. Dooro Settings (Bud-dhigga).
3. Dooro Change PIN.
4. Gali baasweedhkaaga OR PTC DCI.
5. Dooro Verify.
6. Gali PIN-ka Cusub.



7. Gali PIN-ka Cusub Haddana.
8. Dooro Change PIN si aad u kaydiso.
9. Dooro Yes si aad u xaqiijiso baddalidda PIN-ka.



10. Intaas kadib waxaad arki doontaa liid cagaaran oo dhahaya "Pin Changed Successfully!" Hadda PIN cusub ayaad leedahay, loomana baahna tallaabo kale inaad qaaddo.
11. Dooro Home ama astaanta OR PTC DCI si aad ugu laabto bogga hore.




Baddal Su'aalaha Ammaanka

Waxa dhici karta inaad rabto inaad baddasho su'aasha ama jawaabtaada ammaanka. Su'aalahan waxa la isticmaalaa marka aad baasweedh cusub codsanayso. Fadlan hubi inaad doorato su'aalo iyo jawaabo aad xasuusnaan doonto.

1. Dooro astaanta qofka ee ku xigta magacaaga isticmaalaha.



2. Dooro Settings (Bud-dhigga).
3. Dooro taabka Change Security Question.
4. Gali baasweedhkaaga hore.
5. Dooro Verify.



Direct Care Innovations GURI

Kaalmo Khariidadda bogga patrick.stum... Soomaali

BEDDEL LAMBARKA SIRTA AH Guri / Xaqiiji Lambarka sirta ah

BEDDEL BIIN Xaqiiji Lambarka sirta ah

BEDDEL SU'AASHA AMNIGA Lambarka sirta ah: * Fadlan gali Lambarka sirta


BEDDEL IIMAYLKA

XAQIIFI MOBAYLKA

BEDDEL MAGACAISTICMAALAH

Jooji Xaqiiji

6. Ka dooro su'aal ammaan liiska hoos u baxa.
7. Jawaabta gali.
8. Dooro Submit si aad u kaydiso su'aasha ammaanka.



Direct Care Innovations GURI

Kaalmo Khariidadda bogga patrick.stum... Soomaali

BEDDEL LAMBARKA SIRTA AH Guri / Beddel Su'aasha Amniga

BEDDEL BIIN Beddel Su'aasha Amniga

BEDDEL SU'AASHA AMNIGA Su'aal: * Fadlan dooro Su'aasha Amniga

BEDDEL IIMAYLKA

XAQIIFI MOBAYLKA


BEDDEL MAGACAISTICMAALAH Jawaab: * Qor Jawaabta Amniga

Jooji Gudbi

Fiiro gaar ah: Shuruudaha Su'aasha Ammaanka:

- Jawaabta su'aasha ammaanku waxa waajib ah inay ahaato ugu yaraan 5 xaraf
- Magaca isticmaalaha ama baasweedhka looma isticmaali karo jawaabta su'aasha ammaanka
- Haddii jawaabta su'aasha ammaanka laga helo liiska baasweedhka ee sida badan la isticmaalo, waxaad arki doontaa farriinta soo socota:
 - Jawaabta aad bixisay waxa laga helay liiska baasweedhka sida badan la isticmaalo si fudud ayaana loo malayn karaa. Isku day inaad isticmaasho eray ama oraah kale.
 - Haddii aad rabto inaad sii waddo adigoo isticmaalaya erayga ama oraahda aad galisay, guji sanduuqa la saxo ee Use this answer anyway.
 - Haddii aad rabto inaad galiso eray ama oraah kale, ku baddal meesha Jawaabta jawaab cusub.


9. Intaas kadib waxaad arki doontaa liid cagaaran oo dhahaya "Security Question Changed Successfully!" Hadda su'aasha ammaanka waa la baddalay, loomana baahna tallaabo kale inaad qaaddo.
10. Dooro Home ama astaanta OR PTC DCI si aad ugu laabto bogga hore.



Change Email

Waxa dhici karta inaad rabto inaad baddasho cinwaankaaga iimeylka ee kuugu jira faylka OR PTC DCI.

1. Dooro astaanta qofka ee ku xigta magacaaga isticmaalaha.
2. Dooro Settings (Bud-dhigga).
3. Dooro taabka Change Email.
4. Iimeylka hore waa la galiyey.
5. Gali iimeylka cusub.
6. Xaqiiji iimeylka cusub.
7. Dooro Change Email si aad u kaydiso iimeylka cusub.



8. Baadisooc xaqiijineed ayaa loo diray xisaabta iimeylka cusub ee la sameeyey. Gali baadisooca xaqiijineed halkan.
9. Guji Change Email.

10. Dooro Yes si aad u xaqiijiso baddalidda iimeylka.

11. Liid cagaar ah ayaa markaas soo muuqan doona kaasi oo dhahaya "Email Changed Successfully!" Hadda cinwaankaaga iimeylka waa la baddalay, loomana baahna tallaabo kale inaad qaaddo.

12. Dooro Home ama astaanta OR PTC DCI si aad ugu laabto bogga hore.


Xaqiiji Lambarka Taleefanka Gacanta

Waxa waajib ah inaad xaqiijiso lambarkaaga taleefanka gacanta si aad uga hesho farriin qoraal ah OR PTC DCI.


1. Dooro astaanta qofka ee ku xigta magacaaga isticmaalaha.
2. Dooro Settings (Bud-dhigga).



3. Dooro taabka Verify Mobile.
4. Geli lambarka taleefanka gacanta.
5. Dooro Update Mobile Number.



6. Guji Send Verification Code.



Guri / Xaqiiji Mobaylka

Xaqiiji Mobaylka


Lambarkaaga mobilada waa la cusbooneysiiday. Fadlan xaqiiji lambarka mobilada

Moobayl: *

Jooji **Dir Koodhka Xaqiijinta**

7. Waxaad ku heli doontaa farriin qoraal ah oo wadata baadisooqa xaqiijinta lambarka taleefanka ee aad galisay OR PTC DCI. Gali baadisooqa sanduuqa ku calaamadsan "Verification Code".

8. Guji Verify Mobile.



DCI DIRECT CARE INNOVATIONS

GURI

Kaalmo ? Khariidadda bogga patrick.stum...

BEDEL LAMBARKA SIRTA AH

BEDEL BIIN

BEDEL SU'AASHA AMNIGA

BEDEL IIMAYLKA

XAQIJI MOBAYLKA

BEDEL MAGACAISTICMAALAHA

Guri / Xaqiiji Mobaylka

Xaqiiji Mobaylka


Lambarkaaga Xaqiijinta ayaa la soo diray. Fadlan hubi Lambarkaaga Moobaylka ee diiwaangashan

Moobayl: *

7 Koodhka Xaqiijinta: *

Jooji **8** Xaqiiji Mobaylka

9. Liid cagaar ah ayaa markaa soo muuqan doona kaasi oo dhahaya, "Your Mobile Number is Verified." Lambarkaaga taleefanka gacanta hadda waa la xaqiijiyey, loomana baahna wax tallaabo ah oo kale inaad qaaddo.
10. Dooro Home ama astaanta OR PTC DCI si aad ugu laabto bogga hore.



Haddii aad rabto inaad joojiso helitaanka farriimaha qoraalka ah, u dir erayga "STOP" lambarka aad ka hesho farriimaha OR PTC DCI.

Baddal Magaca Isticmaalaha

Waxa dhici karta inaad rabto inaad baddasho magacaaga isticmaalaha OR PTC DCI.

1. Dooro astaanta qofka ee ku xigta magacaaga isticmaalaha.
2. Dooro Settings (Bud-dhigga).
3. Dooro taabka Change Username.
4. Gali magaca isticmaalaha aad rabto sanduuqa New Username.
5. Dooro Change Username si aad u kaydiso.



6. Dooro Yes si aad u xaqiijiso baddalidda.

7. Liid cagaar ah ayaa markaa kadib soo muuqanaya kaasi oo dhahaya, "Username Changed Successfully!" Magacaaga isticmaalaha waa la baddalay hadda.

8. Dooro Home ama astaanta OR PTC DCI si aad ugu laabto bogga hore.